

# Muhiim

Haddii kaadida ilmahaaga la baaro, natiijada shaybaarka waxaad ku helaysa laba todobaad gudahood. Marka aad aqbasho in muunad ama qayb yar laga qaato kaadida ilmahaaga, waxaad aqbashay in kaadidaas la baadhi donoo. Waxaad sidoo kale aqbashay in natiijada shaybaarka lala wadaagi doono Xarunta Cudurada Faafa ee Carruurta ee Qaranka, Xarunta Caafimaadka Rainbow, CHI ee ku taalla Crumlin iyo Wadada Temple. Waxey kugula so xidhidhi doonaan natiijada.

## Muhiim:

**Haddii aadan jawaabta/natiijada ku helin laba todobaad**

Waa inaad la xiriirta labadan mid uun:


- ❁ Waadhka ama qaybta isbitaalka ee aad ku umushay. Faahfaahinta meelaha lagala xiriirayo waxay ku yaalliin xaashidan.

Ama

- ❁ Xarunta Qaranka ee Cudurada Faafa ee carruurta, rugta qaanso roobaadka, CHI ee Crumlin:  
**01-409 6338**

## Fayraska Cytomegalovirus (cCMV) ee lagu dhasho

### Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo masuulada sharciga ah ee carruurta



## Magaca waadhka:

## Lambarka taleefanka ee waadhka:

Fadlan la hadal xubin shaqaalaha ka mid ah haddii aad qabto wax su'aalo ah.

## Waa maxay Fayraska Cytomegalovirus (cCMV) ee lagu dhasho? *(Waxa loogu dhawaaqaa Sight-O-Mega-Low Virus. Waxana loo soo gaabsadaa CMV.)*

CMV waa fayras badanaa la arko. Carruurta iyo dadka waaweyn ee caafimaadka qaba markuu haleelo, CMV wax astaamo xanuun ah ma keeno. Hase yeeshee, ilmaha uurka ku jira waxay yeelan karaan dhibaatooyin caafimaad haddii ay qaadaan CMV. 'CMV ee lagu dhasho' (cCMV) waxa loo jeedaa in ilmuhu ku dhashay caabuqa CMV.

## Sidee buu fayraska CMV u faafaa?

CMV wuxu dadka ugu kala gudbaa taabashada dareeraha jirka. Haddii aad CMV qaado adigoo uur leh, caabuqu wuxu u sii gudbi karaa ilmahaaga. Waxa tan loo yaqaanaa caabuqa CMV ee lagu dhasho.

## Waa maxay astaamaha lagu garto?

Dhallaanka qaba cCMV badankoodu ma laha wax calaamado ah markay dhashaan. Hase yeeshee, tiro yar oo dhallaanka ah ayaa yeelan kara cillado. Waxa ka mid noqon kara dhego beelis.

Dhego beelka uu sababo CMV-ga lagu dhasho wuxu noqon karaa mid dhexdhexaad ah ama mid daran. Waxa laga yaaba inay ka sii darto ka dib marka ilmuhu dhasho.

Haddii ilmahaaga maqalku ka tagay, waxa dhibaataadu saamey kartaa hal dheg ama labadaba.

## Maxaa lagu daweeyaa?

Waxa lagu daaweeyaa dawo ka hortagta fayrasyada. Haddii la go'aamiyo in daawayntu waxtar u leedahay ilmahaaga, waxa fiican in loo bilaabo ka hor intaanu gaadhin 4 todobaad jir. In ilmaha goor hore cudurka laga daaweeyo waxay siinaysa fursadda ugu fiican ee ay faa'iido muddo dheer ah daawada kaga helayaan.

Fadlan iskaan koodhka QR si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CMV-ga xilliga uurka



## Sidee baa lagu ogaadaa caabuqa cCMV?

- 1 Ilmahaaga waxa dhakhtarka maqalku u gudbiyay Waaxda Caafimaadka Maqalka si uu maro qiimeynta maqalka. Waxa ilmahaaga sidoo kale laga baarayaa cCMV. Kani waa baaritaan kaadiyeed.
- 2 Ka dib marka aad ogolaato, waxa la baari doonaa kaadida ilmahaaga 3 todobaad ee ugu horreeya ka dib markuu dhasho. Baaritaankan waxaanu u sameynaa si aanu u eegno in ilmuhu qabo cCMV. Kaadida baaritaanka loo isticmaalayo waxa caadiyan laga qaataa xafaayad ilmuhu ku kaajay. Waxa la adeegsadaa cudbi yar oo la duubay ama qaab kale. Qaab kaadida loo qaadaya waa lagu sheegi doonaa.
- 3 Fadlan hubi in kalkaalisada qaadaysa kaadidad shaybaarka ay hayso lambarka taleefaankaaga iyo cinwaankaaga oo sax ah.

## Baaritaanka kaadida oo cudurka laga waayay.

In kaadida cudurka laga waayo waxay la macno tahay in aanu ilmuhu cCMV qabin. Waraaq baa lagu soo diri doonaa haddii natiijadu sidan noqoto (cudurka ilmaha laga waayo).

**Xasuusnoow:** Weli waa muhiim inaad ilmahaaga keento ballamaha xiga ee Caafimaadka Maqalka.

## Baaritaanka kaadida oo cudurka laga helay.

In kaadidada laga helo cudurka waxay la macno tahay in ilmuhu qabo CMV ee lagu dhasho. Tallaabooyinka xiga waxay noqon doonaan:

- 1 Kooxda Xarunta Carruurta ee Cudurada Faafa ee Rainbow ee ku taalla CHI Crumlin iyo Wadada Temple ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuugu qabtaan ballan bukaan-socod.
- 2 Shaqaaluhu way qiimeyn doonaan ilmahaaga. Waxay go'aamin in ilmahaaga daawayntu wax u tari doonto iyo in kale.
- 3 Waxa aanu kaa dalbaneyna doonaa inaad sii waddo inaad ilmahaaga keento ballama qiimeynta maqalka ee u soo socda iyo sidoo kale booqashooyinka joogta ah ee dhakhtarkaaga guud (GP). Sidoo kale waa muhiim inaad ilmahaaga keento ballamaha kalkaalisada caafimaadka dadwaynaha. Ballamahan waxa ku jira kuwii ilmahaaga ku qaadanayay tallaalada.